

# Fariin muhiim ah oo loo dirayo dadweynaha – mobilkaaga

Xog dheeraad ah ka akhri SE-Alert bogga [mcf.se/se-alert-somaliska](http://mcf.se/se-alert-somaliska)


1



## Iswiidhan ma tahay dal ammaan ah oo lagu noolaado?

Haa. Laakiin mararka qaarkood waxaa dhacaya xaalado halis ah, tusaale ahaan dab weyn ama shil ay ku lug leeyihiin walxo khatar ah. Markaas waa muhiim in dadka si degdeg ah loo gaarsiyo macluumaad.

2



## Waa maxay Fariinta muhiimka ah ee loo dirayo dadweynaha?

Marka ay dhacaan xaalado halis ah, hay'adaha dowladdu waxay diri karaan Fariin muhiim ah oo loo dirayo dadweynaha (VMA) iyagoo adeegsanaya raadiyaha, telefishanka, SMS iyo digniinta bannaanka ee Hesa Fredrik. Iyadoo loo marayo SE-Alert, digniin qaylo-dhaan ah ayaa si toos ah loogu soo diri doonaa mobilkaaga.

3



## Sideen ku helayaa digniinta qaylo-dhaanta?

SE-Alert waxaa loo diraa mobilada casriga ah ee ku dhow goobta ay wax halis ahi ka dhaceen. Uma baahnid inaad soo dejisato app. Si aad digniinta u hesho waa in mobilkaagu yahay mid la cusboonaysiiyay oo shidan.

4



## Sideen ku ogaanayaa digniinta qaylo-dhaanta?

Marka la diro SE-Alert waxaad mobilkaaga ka heli doontaa fariin. Mobilku wuu gariirayaa wuxuuna soo saaraya dhawaaq dheer muddo ku dhow 10 ilbiriqsi.

5



## Maxaan sameeyaa haddii aan helo digniin qaylo-dhaan ah?

Fariinta si deggan u akhri. Waxaa ku qoran waxa dhacay iyo waxa ay tahay inaad sameyso. Macluumaad la mid ah waxaa laga heli karaa raadiyaha, telefishanka iyo internetka. Caawimaad weydiiso haddii ay wax kugu adag yihiin inaad fahanto.

6



## Maxaa dhacaya kadib?

Raac talooyinka ku qoran fariinta. Waxay tusaale ahaan waxay noqon kartaa inaad gasho gudaha guriga, xirto albaabbada iyo daaqaadaha ama aad ka fogaato meel gaar ah. Markaad raacdo talooyinka waxaad xiri kartaa fariinta.